



FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
Ministry of Internal Security
Office Of The Minister

Ref: WAG/XW/ 635 /18

Date: 17 December 2018

WARSAXAAFADDEED

Ku: Shirkada Sahan Research
Ku: Deeq bixiyayaasha Soomaaliya
Ku: Hay'adaha Qaramada Midoobay ee ka hawl gala Soomaaliya
Ku: Hay'adaha Samafalka ah ee ka diiwaan gashan Soomaaliya

Og: Wasaaradaha iyo Laamaha Dawlada oo dhan
Og: Wasaaradda Qorshaynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha
Og: Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisiinta
Og: Xafiiska Raii'sul Wasaaraha, JFS

Wasaaradda Amniga Gudaha waxay qoraalkan ku cadaynaysaa in anaga oo ka duulayna xoga rasmi ah oo ay soo gudbiyeen hay'adaha amniga oo baaritaan ku wada shirkadda ama hay'ada Sahan Research in laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay Diseember 17, 2018 hay'ada ama shirkadda Sahan Research laga joojiyey isla markaana laga mamnuucay dhamaan wixii ay shaqo ka waday waddanka sababo la xiriira amniga qaranka, xasiloonida iyo midnimadda dalka.

Hadaba inta laga soo gabagabeynayo baaritaanada socda waxaa la farayaa shirkadda Sahan Research in ay joojiso dhamaan shaqooyinka ay ka hayaan dalka Soomaaliya, isla markaana waxaa lagu wargalinayaa dhamaan dadka ama hay'adaha xiriirka la leh in aanay wax xiriira ama wada shaqayn ah la yeelan karin Sahan Research maadaama ay shirkadani ku kacday oo faraha kula jirto arrimaha kor ku xusan oo dhaawacaya xasiloonida dalka iyo qaranimadda Soomaaliya.

Qofkii ama hay'adii aan u hogaansamin amarkan waxaa laga qaadayaa tallaabo waafaqsan sharciga dalka.

----- **DHAMAAD** -----